

NIDAAMKA DIIWAANGELINTA BUKAANKA EE

Barnaamijka Xashiishada Caafimaadka ee Minnesota

TALLAABADA KOOWAAD



1

Bukaanku wuxuu sheegayaa xaaladdiisa caafimaad ee u qalma.

Soo booqo mn.gov/medicalcannabis si aad u ogaato xaaladaha caafimaad ee u qalma.

TALLAABADA LABAAD



2

Bukaanku waxa uu raadsanayaa Dhakhtarka daryeelka caafimaadka oo xaqiijiya xaalada.

Dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadku waa in uu galo khadka internetka si uu u xaqiijiyo xaaladaada caafimaad.

Caawinaad helida dhakhtar/daryeel-bixiye caafimaad:

- Weydiiso kooxdaada caafimaadka ama kooxaha dadka u dooda ee kugu metelaya xaaladaada.
- Ka raadi internetka, oo ay ku jiraan websaydyada ay leeyihiin kuwa sameeya xashiishada caafimaadka ee Minnesota.

TALLAABADA SADDEXAAD



3

Bukaanka ayaa waxa uu buuxinayaa arjiga isdiiwaangelinta qaab emayl ahaan uu ku helay waxaana la siinayaa aqoonsi sawir leh 90 maalmood gudahood marka la aqbal.

Kharashaadka diiwaangelinta sannadlaha ah ee bukaanka waa la joojiyey. Araajida waxaa weli dib-u-eegaya shaqaalaha Xafiska Caafimaadka Xashiishka ka hor inta aan la ogolaan.

TALLAABADA AFARAAD



4

Bukaanku wuxuu emailka ogolaanshaha ka helayaa Xafiska Xashiishada Caafimaadka.

Kahor intaan tagin Xaruntaada Qabinta Xashiishada Caafimaadka:

- Qabso ballan.
- Buuxi Is-qiimaynta Bukaanka.

TALLAABADA SHANAAD



5

Bukaanka ama daryeel-bixiyaha ayaa dawada xashiishada ka soo qaada xarun kasta oo Qaybisa Xashiishada Caafimaadka ee Minnesota.

Xarumaha Qaybiya Xashiishada Caafimaadku waxay ku yaalaan: Blaine, Bloomington, Burnsville, Eagan, Hermantown, Hibbing, Mankato, Minneapolis, Moorhead, New Hope, Rochester, St. Cloud, St. Paul, Willmar iyo Woodbury.